

## **Xuquuqdaada dugsiga dadka waaweyn**

Miyaad dhigataa dugsiga dadka waaweyn? Miyaad tahay qof aan ku qanacsanayn xaaladiisa ama miyaad iska hor timaadeen dugsigan? Markaasi waxaad la xiriiri kartaa Dugsiyada dadka waaweyn gudidooda xuquuqda ardayda. Waaxaanu ku siin karnaa talo iyo warbixinta ku saabsan nooca xuquuqda ah ee aad leedahay.

### **Dugsiga dadka waaweyn waa mid bilaash ah oo leh qawaaniin wada-jir ah oo yar.**

Dugsiyada dadka waaweyn waa qaab waxbarasho oo ay hogaamiso ujeedooyin balaaran oo leh qawaaniin wada-jir ah oo yar. Kaalmada dawladeed ee dugsiyada dadka waaweyn helaan si ay ugu socodsiiyaan hawshooda waxaa qaybiya Gudida waxbarashada dadweynaha. Waxaa jira qawaaniin la xiriira kaalmadan, laakiin Gudida waxbarashada dadweynaha ma laha hawsha ah inay baaraan oo hubiyaan dugsiyadan. Sharciga dugsiga ma khuseeyo oo ma jiraan wax ah manhajyo waxbarasho oo dawladeed oo loogu talagalay dugsiyada dadka waaweyn.

Adigaaga dhigta dugsi dadka waaweyn ah micnaheedu waa in maamulka dugsigan yahay kuwa gaaraya go'aamada badankooda kuwaas oo raad ku yeelanaya xaaladaada iyo xuquuqdaada taala dugsigan.

Si loo xoojiyo xaalada sharciyan ee dhamaan ardayda joogta dugsi dadka waaweyn ah waxaa jirta Gudida xuquuqda ardayda ee Dugsiyada dadka waaweyn, FSR.

### **Ma ku qanacsanid miyaa? Miyaad ku jirtaa is-qabsi? Sidan ayaad samaynaysaa adigu!**

Miyaad tahay qof aan ku qanacsanayn xaaladiisa ama miyaad iska hor timaadeen dugsigan? Ta ugu horeysa ee aad samaynaysaa waa inaad la xiriirto maamulaha dugsigan. Haddii aanad qanacsanayn ka dib markaad arrintaada u sheegtay maamulaha dugsiga waa inaad arrintaada wargelisaa maamulka dugsigan. Markay iyagu mawqif ka istaagaan arrintan iyo haddii adigu weli aanad qanacsanayn, markaasi ayaad arrintaada wargelin kartaa FSR.

### **Arrimaha nooc ee ah ayaad wargelin ka samayn kartaa?**

Tani waa tusaale nooca arrimaha la wargelin karo FSR:

- koorsadaadu ma gaarayso wixi dugsigani ku ballan qaaday
- dugsigu wuxuu bixiyay macluumaad khalad ah oo ku saabsan kharashyada khasabka ah
- yaraanta inay ka qayb-qaadayaashu raad ku yeeshaan iyo xuquuqda ardayga
- nidaamyada dugsiga ee loogu talagalay dib ula socodka natiijada waxbarida iyo gabaabsiyo dhinaca joogitaanka ah
- koorso joogsatay ama la baajiyay
- talaabooyin anshaxa ah (tusaale ahaan ka xirida waxbarasho iyo in gooni qofka loo saaro)

Maaha suurtagal in rafcaan laga qaato qiimeynta waxbarasho ee degsan oo loo gudbiyo FSR ama meel kale oo ka baxsan dugsiga.

Fursada in arrin lagu wargeliyo FSR waxay khuseysaa oo keliya adigaaga dhigta koorso ka dheer maalmood. Wargelintan waa inay soo gaartaa FSR ugu dambeyn sannad ka dib ka dib markaad ka tagtay dugsigan.

### **Maxaa dhaca ka dib wargelin?**

Waa maamulka dugsiga waxbarashada dadka waaweyn kuwa mas'uulka ka ah hawlaha dugsigan ee go'aaminaya nooca qawaaniinta ay tahay inay ansax yihiin. Sidaas darteed FSR waxay ka shidaal qaadataa dugsiyada waxbarashada dadka waaweyn qawaaniintooda iyo shuruudahooda marka aanu qiimeyneyno arrin.

FSR weligeed ma badeli karto go'aan dugsi, balse taas baddelkeeda waxaanu talo-soo jeedino siinaa dugsigan. Ilaa imminka dugsiyada laga soo ashkadooday waxay raaceen talooyinka ka yimi FSR.

Miyaad doonaysaa inaad ogaato siday FSR uga fikirtay dacwado kala duwan? Dheeraad ka akhri

[www.folkbildningsradet.se/fsr](http://www.folkbildningsradet.se/fsr)

### **Nagala soo xiriir:**

FSR hawl-wadeenadooda: 08-41248 10

Xarunta Gudida waxbarashada dadka waaweyn: 08-412 48 00

[fsr@folkbildningsradet.se](mailto:fsr@folkbildningsradet.se)